



## Xafiiska Hoggaanka socdaalka ee Oulu waxaa uu u guurayaa bartamaha magaalada Oulu

Xafiiska Oulu waxaa uu u guurayaa xarun cusub oo ku taalla guriga maxkamadda (oikeustalo). Macaamiisha waxaa ay ka soo geli karaan albaabka ku yaalla dhinaca cinwaankiisu yahay Albertinkatu 4, 90100 Oulu.

Guuristaas awgeed ayaa waraysiyadii magangelyoddoonista iyo goobta adeegga ee loogu talaggalay adeegga macaamiisha, waxaa loo wareejinayaa xarunta cusub.

### **Xafiiska adeegga macaamiisha waa uu xiran yahay muddada u dhexeysa 28.11.–2.12.2022, guurista awgeed**

Xafiiska cusub ee adeegga macaamiisha Oulu waxaa uu furan yahay laga bilaabo 5.12. maalmaha isniinaha, talaadooyinka, arbacooyinka iyo jimcayaasha, inta u dhexeysa saacadaha 8.00–16.15. Xafiiska adeegga waa uu xiran yahay maalin kasta oo khamsiis ah. Xilliyada ay furan tahay goobta arrimaha danodhamaysiga ee kaltanka lambarka loo qaato, waxaad ka eegtaa bogga internetka ee [Palvelupisteet](#).

- Marka aad doonayso in aad ballan ka qabsato xafiiska adeegga ee cusub ee Oulu, waxaad ka doorataa qaybeentaa adeegga ee ballan ka qabsashada ([ajanvarauspalvelustamme](#)), magaca ah goobta adeegga ee Oulu (Oulun palvelupiste, Tutkijankuja).
- Haddii aad ballan ka qabsatay goobta adeegga ee Tutkijankuja wixii ka dambeeyay 28.11, wakhtiga ballanka waxaa loo wareejinayaa goobta adeegga ee cusub. Hogaanka scodaalka ayaa kuu soo diraaya farriin, taasoo aad ka heli doonto faahfaahinta dheeraadka ah ee arrinkaan la xiriirta.

Xafiiska adeegga waxaad ka dhammaysan kartaa arrimaha ay ka midka yihiiin

- dhigista codsiyada ku saabsan sharciga degganaanshaha, diiwaangelinta Midowga yurub, iyo codsiyada dhalashada ama baasaboorka
- u imaanshaha aqoonsiga shakhsinnimada.

### **Haddii aad deggan tahay agagaarka Oulu, oo sharcigaaga degganaanshaha ama baasaboorka uu kaa dhacaayo muddada u dhexeysa 26.11.–4.12.2022,**

Waxaad codsigaaga dhigi kartaa

- adigoo ka soo xereysanaaya dhanka adeeggeena internetka ee Enter Finland-ama
- aad iimeyl ahaan ku soo dirto cinwaanka [hakemukset@migri.fi](mailto:hakemukset@migri.fi). Waxed heleysaa jawaab ku saabsan tilmaanbixinada muhiimka ah ee ay tahay inaad samayso.



## **Waraysida magangalyoddoonista iyo wargelinta go'aanka magangelyoddoonista**

Waraysiyada magangalyoddoonista iyo wargelinta go'aammada magangalyoddoonista, waxaa lagu qaban doonaa xarunta cusub laga bilaabo 12.12.2022.

Waraaqda u yeerista ballanka warasyiga magangalyoddoonista iyo munaasabadda wargelinta, ayaa lagu soo qorayaa halka kulanku uu ka dhacaayo.

## **Xafiiska cusub waxaa ka shaqeeya gaadiidka dadweynaha oo aad u fiican**

Marka aad ka soo lugayso xarunta tareennada ee Oulu, waxaad ku imaan kartaa xafiiska cusub muddo dhan qiyaastii 20 daqiiqo.

Maxaddada ama boosteejada ugu dhow waxaa ay u jirtaa 70 mitir, waana maxaddada Virastotalo. Maclumaadka muhiimka ah ee ku saabsan khadka basaska iyo jadwalladooda waxaad ka heleysaa bogga internetka ee cinwaankiisu yahay [oulunjoukkoliikenne.fi](http://oulunjoukkoliikenne.fi)

Haddii aad ku imaanayso gaarigaaga, agagaarka goobta cusub waxaa ku yaalla hoolal loogu talaggalay baarkinka gawaarida iyo sidoo kale baarkinno ku yaalla waddada dhinacyadeeda.

Waxaad kaartada ka eegtaa halka uu ku yaallo xafiiska cusub ([kartta](#)).